Taageerada qaybta 4

Abriil 2011

Section 4 support - Somali

Waa maxay taageerada Qaybta 4?

Haddii gabi ahaanteed la diido ku andacoodista magangalyo doonkaaga, taageerada magagangalyo doonka ee aad ka hesho Xafiiska Arrimaha Guddaha ayaa joogsanaya. Waxaad warqad kugu wargalinaysa arrintan aad ka heli doontaa Xafiiska Arrimaha Gudaha. Hase ahaatee, waxaa laga yaabaa inaad u qalanto taageerada Section 4. Taageerada Section 4 waxa weeye taageero muddo gaaban soconaysa oo uu bixiyo Xafiiska Arrimaha Gudahu laakiin ka duwan ka aan ahayn taageerada aad hadda kahor ku qaadanaysay dhawrka hab:

1. **Kaadhka Azure (Buluuga):** Ma heli doontid wax lacaga. Taageeradaada toddobaadle waxa laguugu shubi doonaa kaadhka bixinta buluuga ah “Azure”. Kaadhla Azure waxaa lagu isticmaali karaa dukaanada qaarkood oo ay ka mid yihiin Asda iyo Tesco si loo iibsado alaabooyinka daruurigaa tusaale ahaan. Cunnada, alaabta musqusha, alaabooyinka nadaafada.
2. **Guri wadaaga:** Haddii aanad xaas lahayn, waxaad u baahan tahay inaad la wadaagto qol dadka kale ee isku sinjiga aad tihiin;
3. **Ikhtiyaar la’aanta guryeynta:** Waxaad helaysaa oo kaliya in lagaa siiyo hal qol Section 4 guryaha. Haddii aad diido bilaa sabab deeqdan, Xafiiska Arimaha Guddaha ayaa laga yaabaa inuu joojiyo taageeradaada; oo
4. **‘Ikhtiyaarka taageero kaliya’ aan la heli karin:** Ma jiro ikhtiyaar aad ku dooran karto qabanqaabadaada guri dejintaada **ood** heshid Qaybta 4 waraaqaha lacag bixinta.

Ayaa u qalma taageerada Section 4?

Scottish Refugee Council ayaa kaa caawinaya inaad codsato Qaybta 4 haddii aad caydh tahay ood u qalanto **mid** kamida shuruudaha soo socda:

1. **Ku andacoode Magangalyo doon cusub/Ku andacoode Xuquuqda Aadamaha:** haddii wakiilkaaga sharcigu uu caddayn ka keenay ku andacoosiga magan galyo doonka cusub ama codsigii ugu danbeeyey. Ku andacoodista waxay u baahan doontaa in la diro anaguna waxaan uga baahan doonaa nuqul kamida dhammaan waraaqaha la diray;
2. **Dib u eegista Garsoorka:** Haddii wakiilkaaga sharcigu uu caddayn ka keenay Dib u eegitaanka Garsoorka oo wata Kalfadhiga Maxkamada. Fadlan noo keen nuqul kamida dhammaan waraaqaha la xidhiidha arrintan ee ka socda qareenkaaga;
3. **Aan ku Haboonayn in la Socdaalo:** Haddii ay jiraan arimo caafimaad oo iska kaa hor istaagaya socdaal aad ku tagi lahayd wadankaaga. Shuruudu arintan socdaalku aad ayay u adag tahay. Waxaad kaliya ood buuxin kartaa shuruudan haddii uurkaagu uu kasareeyo 7 bilood ama haddii aad warqad qoran ka haysato dhakhtar taas oo sharxaysa “Inaanad caafimaad qabin si aad u Socdaasho”. Dhibaatooyinka caafimaad badankoodu loo tixgalin maayo inay yihiin halis;
4. **Ma jiro Khad Badqaba:** Way adag tahay inaad buuxiso shuruudan. Marka loo eego Xafiiska Arrimaha Gudaha, waqtigan ma jiro waddan arintan laga codsan karo. La taliyayaashayada ama wakiilkaaga sharciga ayaa awood u yeelan doona inuu kuu sheego haddii ay arintani isbadasho; ama

Scottish Refugee Council, 5 Cadogan Square, (170 Blythswood Court), Glasgow G2 7PH Tel: 0141 248 9799, Fax: 0141 243 2499,
www.scottishrefugeecouncil.org.uk
Scottish Refugee Council is a charity registered in Scotland.
Registered Charity: SC008639

5. **Soo laabasho Iskaa wax u qabsaa:** Haddii aad caddayn karto inaad qaadato talaabooyin si aad ugu laabato waddankaaga hooyo. (Eeg xagga hoose “Ku laabashada waddankaaga hooyo?”)

Caddaynta caydhnimada

Si aad u buuxiso shuruudaha taageerada Section 4 waxaa waajib kaa saaran yahay inaan ahaato mid aan haysan noocyo kale oo taageerid ah. Haddii ay saaxiibo, qoys ama koox diimeed ay ku caawiyeen waxaad u baahan doontaa inaad sharaxaad ka bixiso sababta ay u sii wadi kari laayihiin inay ku taageeraan.

Haddii ay tani tahay xaaladdaada, fadlan noo keen waraaqo ka socda dadka ku caawinayey oo sharxaya cida ay yihiin, siday kuu caawinayeen, waqtiga ay ku caawinayeen iyo sababta aanay u sii wadi karin in ay kuu caawiyaan. Qoddobkan ugu danbeeyaa aad ayuu muhiim u yahay.

Waqti intee leeg ayey soconaysaa codsiga Section 4?

Wuxuu qaadan karaa dhawr toddobaad inta uu Xafiiska Arrimaha Gudahu uu wado nidaamka codsigaaga. Waxaanu si joogto ah ula socon doonaa horumarka codsigaagu oonu kula soo xidhiidhi doono isla markaanu ogaano go’aanka, sidaas darteed hubso inaanu kaa helno tafaasiisha lagaagala soo xidhiidhayo oo noo sheeg haddii ay isbadalaan. Looma baahna inaad timaado xafiiskayaga si aad u ula socoto horumarka uu samaynayo codsigaagu. Haddii aad jeceshahay, waxaad dirsan kartaa lambarka telefoonkayaga bilaa lacagtaa ee 0800 085 6087 (ka madax banaan laynka telefoonka een laakiin ahayn telefoon gacmeedka).

Haddii laguu oggolaaday taageerada Section 4, waxa kula xidhiidhi doona bixiyahaaga guriga si loo qabanqaabiyo taariikhda tagista guriga aad ku noolaan doonta.

Wakiilka ayaa ku tusi doona guriga, ku siin doona tafaasiisha lagala xidhiidhayo ku waydiisanna doona inaad saxeexdo heshiiska guriga. Bixiyaha gurigaaga ay ah kan ka masuulka ah dayactirka gurigaaga. Haddii aad hayso su’aalo ku saabsan guriga, la xidhiidh wakiilkaaga adoo isticmaalaya tafaashiisa ay ku siiyeen.

Rafcaanada

Haddii codsigaaga la diido, waxaa laga yaabaa inaanu awoodno inaan u qorno rafcaan anagoo kaa wakiila. Tani waxay la xidhiidhi doontaa sababaha Xafiiska Arrimaha Gudduhu u diiday taageerada. Codsigan waxaa loo gudbin doonaa urur madaxbanaan oo lagu magacaabo First Tier Tribunal (Taageerada Magan-galyo doonka) oo degan Croydon, London. Waxaad ka codsan kartaa inaad ka soo qayb gasho codsiga haddii aad rabto inaad ka doodo dacwadaada. Xafiiska Arrimaha Gudaha ayaa bixin doona safarkaaga iyo guryo dejintaada haddii aad u sheegto iyaga inaad jeceshahay inaad kasoo qaybgasho.

Dib ugu laabashada waddankaaga hooyo?

Haddii aad xiisaynayso inaad oggaato wax ku saabsan inaad ku laabato waddankaaga hooyo, waxaad la xidhiidhi kartaa Ururka Laanta Socdaalka Adduunka (IOM) ee xafiiskooda Glasgow cinwaanka soo socda:

International Office of Migration (IOM)
38 Queen Street, Glasgow
Telefoonka ballanta: 0141 548 8116

Talooyin iyo cabashooyin

Had iyo jeer rayi ka bixintaada waa la soo dhawaynayaa waxaanay naga caawisnaysaa inaanu wax ka badalno macluumaadkayaga iyo adeeggaya.

Haddii aad rabto inaad talo ka bixiso sidii aanu u sii horumarin lahayn macluumaadkayga ama adeeggayada, fadlan dhammaystir foomkayaga jawaab celinta. Waxaad ka heli kartaa foomka shaqaalahayaga jooga xafiiskayaga ama waxaad kala soo bixi kartaa shabakaddayada barta internet-ka: http://www.scottishrefugeecouncil.org.uk/assets/0000/0305/Complaint_leaflet_Somali_March_2010.pdf

Fadlan ku soo celi xafiiskayaga foomka oo dhammaystiran.

Sidoo kale waxaad u soo caban kartaa Wakiilka Xafiiska Laanta - Socdaalka (WXLS): http://www.oisc.gov.uk/